



Guddoonka Golaha Waxbarashada PPS waxa ay ku dhiirigalinayaan dadweynaha codeeya in loo codeeyo ‘haa’ Xeerka 101 (Measure 101)

Guddoonka Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waxa ay codeeyaasha ku dhiirigalinayaa in la ansixiyo Xeerka 101, kaasi oo kor u qaadaya cashuurta qaar ka mid ah daryeelayaasha caafimaadka iyo caymisyada caafimaadka si ay u caawiyaan Qorshaha Caafimaadka Oregon(OHP).

Maalinta kama dambeysta ee codbixintu dhacaysaa waa Janaayo 23keeda, iyada oo codbixintani doorashada khaaska ahi ay gobolka oo dhan ay ka dhacayso.

Kulankii xubnaha guddoonka golaha waxbarashada ee Janaayo 9keedii, waxa ay meel mariyeen qaraar taageeraya xeerkani, kaasi oo tibaaxaya in ay lagama maarmaan tahay in la siiyo caruurta daryeel caarimaadka oo boqolkiiba boqol ah. Haddii xeerkani guuldareysto, gobolku wuxuu wajjhi doonaa hoos u dhac dhinaca miisaaniyada ah taasi oo sababi doonto in la jaro iskuulada, ayey yiraahdeen goluhu.

“Haddii lagu guuldareysto in la ansixiyo xeerkani, taasi waxay keeneysaa heer gobol ahaan in aanu sameyno doorasho adag oo dhinaca miisaaniyada ah,” ayey tiri Guddoomiye-xigeenka Golaha Waxbarashadu Rita Moore. “Haddii ay miisaaniyadu hoos u dhacdo, waxa aad u suurtagal ah in ay raad ku yeelato miisaaniyada dugsiyada K-12. Waxa aynu xooga saareynaa sidii loo ansixi lahaa xeerkan, kaliya ma ahayn in qoysaskeena caymiskooda caafimaad u sii shaqeeyo, taasi oo aan ahayn kaliya caymiska caafimaadka qoysaskeena laakiinse sidoo kale waa caafimaadka guud ee degmada oo dhan.”

Paul Anthony oo ka mid ah xubnaha guddoonka waxbarashadu wuxuu xusay daryeel caafimaad oo wanaagsani wuxuu la mid yahay nidaamka waxbarashada oo wanaagsanaada. “Caruur aan caafimaad qabin waxba ma baro karto,” ayuu yiri.